

# Ruqsada Seattle

-qeyb ka mid ah taxanaha waaxyada-badan ee ku qoran adeegyada Magaalada iyo shattiyada

## Shuruudaha iyo Kormeeraha Badqabka Dabka ee Munaasabadaha Habaynkii iyo Goobaha Madadaalada

Waxaa la cusbooneysiinta Janaayo 2025

Xeerka Dabka ee Seattle waxaa ku jira shuruudo gaar ah oo quseeya xarumaha munaasabadaha, baararka iyo kalaabyada habaynkii shaqeyya. Qaar kamid ah shuruudahaas ayaa quseeya dhismaha qudhiisa, tusaale, nidaamka biyaha firdhiya ayaa caadiyan qasab ah in goobtu lahaato. Shuruudaha kale ayaa quseeya sida dhismaha loo nadiifiyo loona maamulo. Qoraalkaan Taakuleynta Macaamiilka wuxuu xog kooban ka bixinayaa shuruudaha xeerka ugu muhiimsan iyo xadidaadaha. Wuxuu sidoo kale xog ka bixinayaa waxa la samaynaayo haddii aad hesho ogaysiis kaa dalbanaaya inaad saxdo khalad jira ama cilad la ogaaday intii ay kormeerka waday Seattle Fire Department.

### Shuruudaha Kalaabyada iyo Goobaha Madadaalada (Goobaha Dadku Iskugu Yimaadaan)

1. Boor cadaynaaya "cadadka dadka meesha ku jiri kara" ama tirada dadka la ogol yahay inay halkii mar ku wada jiraan goobta ayaa qasab ah in lagusoo dhajiyo irida ugu wayn ee laga galo goobtaas. Tirada dadka ku jiraaya goobta ee ku qoran boorku waa inay waafaqsan tahay tirada dadka lagu ogolaaday inay markiiba ku jiraan goobta ee ku qoran Shahaadada Soo gelitaanka goobta. Waxii xog dheeraad ah ku saabsan Shahaadada Soo gelida ka fiiri barta: <http://www.seattle.gov/fire/business-services/permits#annualassemblyoccupancies>.
2. Ogolaanshaha saxda ah ee Seattle Fire Department ee goobta la iskugu yimaado waa in lagusoo dhajiyaa meel loo jeedo haddii goobta la iskugu imaanaayo ay haysato ogolaanshaha inay geli karaan markiiba 100 qof ama ka badan, ama 50 qof ama ka badan haddii shumacyo ama dab furan lagu isticmaalaayo.
3. Dadka meesha ku jira kama badan karaan cadadka ku qoran boorka.
4. Inta lagu jiro saacadaha shaqada, dhammaan albaabada laga baxo waa inay furnaadaan aana la xirin. Albaabada laga baxo waa in si fudud loo furi karaa ayadoo la adeegsan fure ama aqoon gaar ah.
5. Dhammaan nidaamyada kahortaga dabka, ayna ku jiraan ganbaleelada dabka, tuubooyinka biyaha sayra, marwaxadaha dabka damiya iyo agabka dab damiska waa inay lahaadaan

calaamado sax ah oo muujinaaya inay yihiin kuwo la adeegsan karo si waafaqsan shuruudaha kormeerka, tijaabada iyo dayactirka.

6. Albaabada iyo marinnadu waa inay yihiin kuwo dadku arki karaan, nal fiican ku xiran yahay aana waxba ku go'nayn jidkooda. Xakabadaha loo adeegsado kala xadidida dadka sida meelaha lagu hubiyo aqoonsiyada macaamiisha ama xargaja iyo tiirarku waa inaysan xanibin meelaha laga baxo sinaba.
7. Adeegsiga shumacyada ayaa la ogol yahay marka la raaco shuruudaha ogolaanshaha.
8. Bulalaydyada lama ogola, ilaa in xaruntu haysato maahee Ogolaansha Adeegsiga Bulalayd ee Seattle Fire Department.
9. Sharaxaada gudaha, daahyada iyo agabka xakameeya dhawaaqa codka waa inay buuxshaan heerarka faafinta ama difaaca ka dhanka ah dabka. Dukumiintiyada ay aqbasho shirkada agabka soo saarka ama shirkada ansixinta ganacsiga agabka dabka waa inuu leeyahay dhismuhu kaasoo sheegaaya in agabku buuxsheen heerarka loo baahnaa.
10. Fiilooyinka la isku xiriray looma adeegsan karo inay badalaan fiilooyinka rasmiga ah.

### Shuruudaha u kahortaga Dabka ee Agabka Sharaxaada

Agabka sharaxaada ee xarumaha dadku iskugu yimaadaan ayaa laga doonayaa inay yihiin kuwo dabku uusan sahal u qabsanayn si waafaqsan heerarka qaranka, sida kuwa lagu dajiyay Heerka Qaran ee Kahortaga Dabka 701, Difaaca Dabka ee Gobalka California ama Ururka Caalamiga ah ee Badeecooyinka Canvas-84. Agabka sharaxaada ah waxaa ku jira alaabaha la suro darbida, maryaha sharaxaada loo sudho, daahyada, calamada iyo agabka kale ee sharaxaada. Dharka miiska cuntada looma aqoonsanaayo agab sharaxaad loomana baahna inay noqdaan kuwo aan dabku qabanayn.

Dukumiintiga ay soo saartay shirkada agabka samaysay ama shahaadada kahortaga dabka ee shirkada ka hortaga dabka ee agabka ganacsiga ayaa loo baahan yahay si ay cadayn kugu noqdaan kahortaga dabka ee agabka sharaxaada goobta. Maaha wax la aqbali karo inaad daawayso agabka sharaxaada si iskaa ah adoo marinaaya agabka ka difaaca dabka e lagu dhayo. Ka fiiri bogaga jaallaha ah ama xogta oonleenka ah ee ku aadan adeegyada kahortaga dabka.

### Qorshayaasha iyo Habraaycada Xaaladaha Degdega ah

[www.seattle.gov/fire](http://www.seattle.gov/fire)

Fire Prevention Division

220 3rd Avenue South

[www.seattle.gov/fire/business-services](http://www.seattle.gov/fire/business-services)



City of Seattle  
Fire Department

Qorshaha xaalada degdega ah oo sheegaaya marinnada laga baxaayo, waajibaadka shaqaalaha, fariimaha shaqaalaha maalmaha gaarka ah shaqeeya iyo agabka kahortaga dabka ayaa loogu baahan yahay dadka soo galaaya iyo kuwa ka baxaaya xarunta leh fasaxa inay qaadi karto 100 qof ama ka badan. Qorshayaasha loo dajiyay ka bixida goobaha dadwaynuhu iskugu yimaado. Kalaabyada habaynkii ee leh fasaxa ah inay qaadi karaan 100 qof ama ka badan ayaa markasta laga doonaaya inay lahaadaan qorshaha badqabka iyo daad guraynta dadka. Fadlan akhri [Qoraalka Taakulaynta Macmiilka ee SFD #5051](#) si aad u hesho xog ku aadan qorshayaasha xaalada degdega ah. Marka lagu daro shuruudahaan guud, kalaabyada habaynkii ayaa sidoo kale laga doonayaa inay keenaan qorshaha kuraasta oo faahfaahsan, dadka soo geli kara goobta markiiba, iyo xadiga u degsan dadka goobta soo galaaya oo qayb ka ah qorshahooda xaalada degdega ah.

### Shuruudaha Tuubooyinka Biyaha firdhiya ee dab damiska ee Kalaabyada Habaynkii ee cusub iyo Kuwa Horay U jiray, Maqaayadaha iyo Baararka

Xeerarka Dabka iyo Dhismaha ee Gobalka Washington iyo Seattle ayaa qasab ka dhigaaya in nidaamyada si ootomaatiga ah biyaha u sayriya lagu xiro dhammaan dhismayaasha hadda la dhisay iyo "kalaabyada habaynkii" ee horay u jiray ee kooxaha A-2. Haddii aad dhisto, adeegsato ama u badasho dhisme ama naqshad "kalaabka habaynkii" sida lagu qeexay Xeerka Dabka ee Seattle, waxaa qasab ah inaad buuxiso dhammaan shuruudaha xeerka ee kalaabka habaynkii.

"Kalaabka habaynkii" waxaa lagu qeexaa xarun ay Dadku isku yimaadaan oo ku jirta kooxaha A-2 taasoo leh aaga guud oo loo adeegsado kuraas lagu fariisto oon meel ku dhaganayn iyo boos caadi ah kaasoo si gaar ah loogu sameeyay rasmiyana loogu adeegsado dheesha iyo muuqaalka dadka kalaabka ka dheelaaya ay ka badan tahay 350 iskuweer fiid, marka laga reebo aaga loo sameeyay in dadku ku nastaan.

"Kalaabka habeenkii" kuma jiraan masraxiyada leh kuraasta lagu dhisay goobta hoolka ah, ama hoolalka hudheelada. Hoolalka dhawaan la dhisay ee la iskugu yimaado, maqaayadaha ama baararka aan buuxin qeexitaanka "kalaabka habaynkii" laakiin ku jira aqoonsiga goobaha gudaha loo galo ee A-2 waa inay ku rakibaan goobta agabka biyaha firdhiya marka mid kamid ah kuwa soo socda uu jiro:

- Aaga dabku uu ka balaaran yahay 5,000 oo iskuqeer fiid, ama
- Tirada dadka goobta soo galaaya markiiba ay tahay 100 ama ka badan, ama
- Aaga dabku ku yaalo dabaq aan ahayn meesha looga baxaayo dhismaha (ma quseeyo aagaga dabka ee uu ku jiro booska ku yaala hal dabaq oo ka koreeya heerka meesha loo baxaayo goobta haddii tirada dadka ku jiraaya dabaqa sare ay ka yar tahay 50).

Ganacsiyada hadda ku shaqeeya qaab buuxinaaya qeexitaanka kalaabka habaynkii laguma shardinaayo nidaamka biyaha firdhiya haddii ay

badalaan shaqadooda ganacsiga qaab aysan ku buuxin doonin hadda kadib shuruudaha ku qoran qeexitaanka kalaabka habaynkii.

### Kormeeraha iyo Fulinta Waaxda Dab damiska

Kormeerayaal ka socda Seattle Fire Department ayaa samayn doona kormeerada maalintii oo qayb ka ah barnaamijkeena kormeerka sanadlaha ah. Waxaa intaas dheer, Kooxda Wadajirka ah ee Fulinta City of Seattle ayaa kormeer samaynaysa habaynkii marka xarumaha kalaabyada habaynkii iyo xarumaha madadaaladu ay furan yihiin. Haddii la ogaado in la jabiyay Xeerka Dabka ee Seattle inta lagu jiro mid kamid ah kormeeradaan, waxaad heli doontaa ogaysiiska sixitaanka khaladka ama soo jeedinta sarkaalka xeerka dabka. Markay jiraan xaalado leh khataro degdega ah oo aad u sareeya oo dhanka badqabka ah, oo ah inaan la raacin shuruudaha liiska ku qoran, Shaqaalaha Dabka ama Sarkaal Ka socda Waaxda Dabka ayaa sidoo kale **xiri kara munaasabada iyo/ama dadka ku jira goobta kala cayrin kara** ilaa walaacyada jira xal loo helo.

Ogaysiiska **sixitaanka khaladka** ayaa u cayimi doona taariikh ay tahay in gudaheeda lagu saxo khaladka. Waaxda Kahortaga Dabka ee Seattle Fire Department ayaa mar kale kormeeraysa si loo hubiyo in xadgudubka sharciga la xaliyay. Kormeerka ku celiska ah ee lagu xaqiijinaayo ku dhaqanka xeerka ayaa xarunta looga qaadayaa qarash dhan \$433.

Xad gudubyada qaar ayaa keenaaya khataro ay qasab tahay in degdeg loo saxo xad gudubyadaana waxay badanaa helayaan **amarka kormeeraha** halkii laga siin lahaa ogaysiiska sixitaanka. Amarku waa ogaysiis aan danbiile kaa dhigayn oo ku aadan xad gudub ayna ku jirto ganaax lacageed oo dhan \$433 marka koobaad oo xad gudub gasho, iyo \$866 lagaaga qaadaayo xad gudubyada ka danbeeya kaasta oo dhaca muddo 12 bilood ah gudaheed. Kootooyinka waa laguusoo diri doonaa ama caadi laguugu keeni doonaa. Haddii aad hesho kootada, waa inaad ku jawaabta 15 maalmo kaalandar mid ka mida saddex hab:

1. Bixi kootada.
2. Codso baabiinta dhageysiga si aad u sharaxdo xaaladaha. Kiisaska qaar, baabiinta waxey dhali kartaa ganaax hoose. Dhageysiga baabiinta waa in la codsadaa qoraal ahaan adigoo isticmaalaya foomkakootada fariimeysan/laguugu keenay adiga. Kahor intaan dhagaysiga dhexdhexaadinta ah la qaban, waa inaad saxdaa xad gudubyada.
3. Codso ogolaanshaha soo xigashada haddii aad aaminsantahey tacadiga kootada aanu dhicin ama inaanu qofku meelayn kama masuul aha tacadiga. Dhageysiga tijaabada kootada waa in lagu codsadaa qoraal iyadoo la isticmaalayo foomka soo xigashada fariimeysan/adiga laguugu keenay.